# Cutubka 3aad – Ka qaybgalka Bulshada – Kulamada Golaha

## Qaybta 15aad - Ka qaybgalka bulshada

## Horudhac

Fadhiyada guud waxay u yihiin fursad Xidhibaanada si ay uga qaybgalaan wada hadalka ku saabsan arrimaha u faaiidaynaya samaqabka bulshada, sidaas darteed go'aano ayaa la samayn karaa kuwaas oo matala danta guud ee degmada. Sida waafaqsan *Xeerka 2020* ee Dawlada Hoose, Banyule waxay u sisaa xubnaha bulshada fursadaha si looga qaybgalo fadhiyada Golaha siyaalaha soo socda:

- Soo gudbinta codsi rasmiya si aad u hadasho
- Diiwaangelinta Su'aal Dadweyne, iyo
- Xeraynta loolan dacwadeed

Xubnaha bulshada ayaa iyaguna raadin kara inay u sheegaan xubnaha Golayaasha fikradooda iyagoo toos ugala xiriiraya Fadhiga Golaha.

Cutubka 3aad ee Shuruucda Dawlad wanaaga waa in la akhriyaa iyada oo lala xiriirinayo balanqaadka adeega Macmiilaha Banyule iyo Nadaamka Dabiiciga ah ee aan suurtageli karayn ee Macmiilaha.

### 65 Dadweynaha oo ka hadlaya fadhiga – Shuruucda Guud iyo hagayaasha

1. Kulanka Golaha, marka Goluhu aanu xalin si loo soo xiro fadhiga wixii la xiriira arrinta hoos imanaysa qaybta 66 (2) ee Xeerka, waqti ayaa laga yaabaa in loo qoondeeyo si waafaqsan Shuruucda Dawlada si loogu suurtageliyo qof walba inuu ka hadlo Golaha arrin ay ku jira Ajandaha (wixii la soo gudbiyey), ama arrima la xiriira siyaasad istaraatiij ah, u hadlid, am amasalaad (Su'aalaha dadweynaha).
2. Codsiyada looga hadlayo wixii la soo gudbiyey, Su'aallaha Daweynaha iyo wixii la soo gudbiyey waa in lagu ekaayee kariteriyada loo dhigay Shuruucdaan Dawlad Wanaaga laguna hagaajiyey Gudoomiyaha ama Duqa maalintaas. Haddii goluhu go'aasado inuu dib ugo dhigo dooda qodobka ajandaha taariikh kale.
3. Haddii Goluhu go'aansado in uu dib ugu dhigo qodobka ajandaha maalin kale, qof kasta oo u diiwaangashan in uu la hadlo golaha waxa waajib ku ah inuu fidiyo ixtiraam ahaan, oo ixtiraamaa Golaha, iyo habka u uku shaqaynayo, waxaana waajiba inuu talo ka qaato Gudoomiyaha ama Duqa magaalada oo maalintaas.
4. Xubin ka mid ah dadweynaha oo joogta fadhiga Golaha waa in aanay carqaladayn fadhiga, isku day kasta oo sidaas lagu sameeyana waxay sababaysaa heer amaro o ku dhawaaqo Gudoomiyaha xildhibaanka jooga fadhiga.
5. Aamusnaanta waa in la ilaaliyaa galleriga  dhexdiisa mar walba.

6. Xubnaha dadweynaha waxaa la xasuusinayaa in Xildhibaanada, shaqaalaha Golaha, iyo xubnaha kale ee dadweynaha oo jooga fadhiga galleriga dhexdiisa, ay qayb ka yihiin bulshada. Dhamaan xubnaha bulshadu waxay xaq u leeyihiin inay ahaadaan bay'ad amaanaoo xor ka ah rabshad afeed ama jireed.
7. Duqa ama guddoomiyaha Kulanka Golaha wuxuu awood u leeyahay inuu sameeyo ogolaansho kasta ama uu qadariyo xaallad kasta ama qadarin kasta, taas oo dibada ka ah xuduuda loo dhigay Shuruucda hab-maamuleed ee la raacayo, wixii la xiriira ka qaybgalka bulshada ee kulanka Golaha.

### 66 Shir-Gudoomiyaha ayaa laga yaabaa inuu ka saaro

Guddoomiyuhu waxaa laga yaabaa inuu amro kana saaro qof kasta (xubinta galleriga iyo/ama Councillor-ka) kaas oo

- Carqaladaynaya fadhi kasta
- Samaynaya dabeecad taas oo si dhaqso ah u cabsi gelinaysa fadhiga;
- Si khalad ah u handadaysa xasiloonida fadhiga; ama
- Ku guuldaraysta inay raacdo awaamiirta la siiyey ee xeerka 65aad.

> Intaas waxaa wehelisa, waxaa jirta awood degdeg ah oo la siiyey Duqa magaalada sida waafaqsan qodoka 19(1)(b) oo xeerka Dawlada Hoose ee 2020 si loo jaheeyo xildhibaanka, waxaase shardi ah, hanaan kasta ama xadadka Shuruuc u-hogaansanaanta, si looga tago fadhiyada Golaha haddii dabeecada Xildhibaanku ay ka celinayso Shuruucda xukuumada, si looga tago fadhiga Golaha haddii akhlaaqda Gudoomiyuhu ay ka joojinayso Golaha inuu qabsado hawshiisa.
>
> Waxaa looga jeeda in uu samayn karo Duqa magaalada, iyadoo oo aan looga baahan wax xal ah golaha.

### 67 Codso in aad hadasho

Codsiga in la hadlo waxay siisaa xubnaha bulshada ee uu saamayey go'aanka soo socda oo golaha oo leh fursada in:

- lagu maqlo aragtidooda; iyo
- In lala hadlo xubnaha golayaasha kulanka ka hor intaan go'aanka la samayn.

Iyada oo xubnaha bulshadu ay kala xiriiri karaan golaha dhici doona kaga hadlaan fadhiga golaha bulshada wuxuu siiyaa xubnaha bulshada ee uu saamayey go'aanka Golaha Degmada qodob walba, oo aad fursada u heshay inaad maqasho aragtidooda lana hadasho Golayaasha jooga fadhiga qodobada ka hor intaan go'aanka la samayn.

Iyada oo xubnaha bulshadu ay la xiriiri karaan Golaha iyaga oo maraya xiriirka macmiile ee caadiga ah ee laga heli karo Banyule goob kasta. Codsiyada caadiga ah ee lagu hadlo waxay siisaa bulshada fursada ugu dambaysa ee ay kula wadaagaan aragtidooda. Shuruudaha 'qadimaada dadweynaha' iyo soo-qadimida' waxaa loo isticmaalaa isweydaarsi leh shuruuda Codsiyada lagu Hadlo. Mid kasta oo ka mid ah shuruudahaan ayaa leh isla macnihii Xeerarkaas Dawliga ah.

Sidaas darteedna leh isla macnihii.

(1) Xubin ka mid ah dadweynaha ayaa laga yaabaa inay codsato inay ka hadasho fadhiga Golaha ajanda kasta oo liiska fadhigaas ku jira.

(2) Codsiyada in la hadlo waa in la soo qadimo ugu dambayn 12 duhurkii maalinta kulanka, waxaana loo soo qadimi karaa:

(a) Iyada oo rasmiyan loo samaynayo codsi lana soo marsiinayo nadaamka jira ee loo yaqaan qaadaha ‘Request to Speak’ oo ku yaalla websaytka ‘Banyule website’ ama

(b) Waxaa lagu soo diri qoraal waxaana la geynayaa: Governance, Level3,1Flint off Street, Greensborough, ama 275 Upper Heidelberg, Ivanhoe.

(3) Xubnaha dadweynaha ayaa laga yaabaa inay ka hadli karaan Golaha iyagoo:

(a) Bixinaya soo gudbin qoraal ah oo uu akhriyo qof ka tirsan shaqaalaha goobta ee kulanka Golaha.

(b) Soo gudbinta Fiidiyow horay loo duubay si loo muujiyo kulanka Golaha.

(c) Soo gudbinta farriin maqaala oo la duubay si looga daaro kulanka Golaha; ama

(d) In aad timaado kulanka Golaha shakhsiyana ula hadasho xubnaha Golaha (marka la qadimo codsi rasmi ah).

(4) Xubin kasta oo dadweynaha ka tirsan oo is diiwaangeliyey waa in uu la hadlaa Golaha iyagaana codsan kara in uu ka hadlo 2 qodob fadhigiiba.

(5) Tirada ugu badan oo dadka la ogol yahay inay ka hadlaan qodob laga liisgareeyey Ajandaha waa sadddex qof oo ka soo horjeeda qodob ajandaha ah. Tan waxaa looga jeedaa in la hello aragtiyo xaq u leh oo matalaya oo isu dheelitiran oo ku saabsan qodob ku jira ajandaha laga hadlayo.

(6) Qof walba oo hadlaya waxaa lagu martiqaadi doonaa inuu ka hadlo qodob ajandaha ku jira oo goluhu qadariyey.

(7) Waqtiga ugu badan oo la ogol yahay in qofkiiba uu ka hadlo ajandaha waa 2 daqiiqo, wax kasta oo siyaada waxaa go’aan ka gaari kara Duqa ama Gudoomiyaha.

(8) Qofka hadlayaa waa in uu ku ekaadaa mawduuca laga hadlayo (qodob ajanadaha ku jira oo horay loo codsaday). Haddii hadalku aanu la xiriirin ajandaha horay loo codsaday, ama aanu qancin karateeriyada sida lagu faahfaahiyey qodobka 68aad, Gudoomiyaha ama Maayarka maalintaas ayaa soo jeedin kara amar raacid (point of order). Haddii Duqa magaalada ama Gudoomiyuhu hadal ka keeno (point of order) qodobka, soo gudbiyaha waxaa waajib ku ah in uu soo jeediyo qodobka ajandaha keliya, ama joojiyo wixii tacliiqa oo lagu jebinayo shuruucdaan.

(9) Councillor-ka ama xubinta shaqaalaha ayaa laga yaabaa in uu u jaheeyo su'aasha Duqa degmada ama qofka shir gudoominaya caddaynta qofka hadlaya si uu waadax ugu fahmo qodobka qofka hadlaya aragtidiisa. Waxay noqon doontaa arrin uu go'aankeeda leeyahay duqa magaaladu haddii su'aasha la ogolaan karo.

Shuruucda Xukunka | CD17788

(10) Dhamaan su'aalluhu waa inay ahaadaan kuwa gaaban intii suurtagal ah, lamana ogolaan karo wada hadal ama dood xubnaha Golayaasha degmada waqtigaas aan ka ahayn ujeedooyinka kala saarida ee laga soo jeediyey soo gudbinta

(11) Dhamaan caddaymuhu maaha inay ahaadaan af la gaado, sumcad dilid, ama diidmo xagga luqada, mana aha in lagu toosiyo shakhsi xubnaha degmada ka mid ah, xubin shaqaale, cashuur bixiye, ama xubin dadweynaha ka mid ah ama la xiriirta xaalladooda shakhsiyeed. Masalan markay tahay Shir-Gudoomiyaha ama Duqa magaalada ayaa weydiin doona qofka soo gudbiyey si loo joojiyo hadalka.

(12) Dhamaan soo gudbiyayaasha waxaa waajib ku ah inay wajahaan Shir-gudoomiyaha ama Duqa magaalada intay socoto soo gudbinta afka ahi.

(13) Xaallada halka 'qofka soo gudbinayaa' uu u hadlayo koox ama shakhsiyaad qaba isla fikrada, waxay xaq u leeyihiin inay sidaas sameeyaan laakiin ugu badnaan 2 daqiiqo, ama sida uu ku ogolaado awooda Duqa magaalada ama shir gudoomiyaha.

(14) Qofka hadlaya ayaa codsan kara in qof kale u hadlo iyaga awoodooda qof maqan ahaan.

(15) Iyada oo waafaqsan xeer hoosaadka 15aad, waxaa waajiba in la hello ogolaansho qoran oo saddexaad haddii ay tahay waajib in laga hello qofka u hadlaya kaas oo aan awoodin inuu yimaado oo siiyo kooxda maamulka si loo xaqiijiyo in aragtiyaha uu muujiyey qofka maqani ay tahay run sax ah, lamana xagal daacin karo ka hor 12ka duhurkii maalinta shirka.

(16) Soo gudbinta waxaa laga yaabaa in aanu ogolaan shir gudoomiyuhu haddii:

(a) Aanay la xiriirin qodob ajandaha ah sida lagu sharxay fadhi gaara;

(b)Waxay la xiriirtaa xaallad gaar ah oo mawduuca oo uu horay wax yiri sharxay qofkii horay u hadlay;

(c) Waxay la xiriirtaa xaallad ka baxsan waajibaadka, hawlaha iyo awoodaha dawlada hoose;

(d) Waa meel ka dhac, edeb daro, aflagaado, wax aan khusayn, wax aan macna lahayn ama waxaan la qaadan af iyo xaallad toona;

(e) Waxaa looga jeedaa ceebaynta xubinta guddiga degaanka ama xubin ka tirsan shaqaalaha Golaha degmada;

(f)  Waa soo gudbin loo diray shakhsi ka tirsan golaha ama xubin ka ah shaqaalaha golaha;

(g) Waxay la xiriirtaa xaallad shakhsiyeed ama dhibaato shakhsiyeed oo cashuur bixiyaha ama degani, xubin ka tirsan guddiga degaanka, xubinta golaha degaanka ama xubin ka tirsan shaqaalaha dawlada hoose;

(h)  Waxay la xiriirtaa xaallad kasta oo kale oo Duqa Degmada ama Gudoomiyuhu u arkay inay waxyeellayso Golaha ama qof kasta oo kale;

(i)  Waxay la xiriirtaa xaallad ay tahay, ama loo arkay xaallad qarsoodi ah, la xiriirta xaallad kasta wixii khuseeya golaha laga yaabo inay xiraan kulanka dadweynaha sida waafaqsan 66 (1) oo xeerka;

(j)  La xiriirta arrin hoos imanaysa gudoonka si gaara mawduuca (ama aragtida gudoomiyaha khusaysa) hab raaca sharciga) meel marinta sharciyeed); ama

(k)  Qofka soo gudbiyey ma aanu soo qadimin foomka sida waafaqsan shuruucdaan.

(17) haddii codsiyada in hadalo la helay wixii ka dambeeyay 12 duhurkii ee maalinta kulanka, waxaa lagula talinayaa qoraal ahaan, in wakhtigii kama dambaysta ahaa xirmay. Haddii soo gudbinta la helay ay buuxiso shuruudaha lagu qeexay qaybta 68 ee Xeerarkan, waxaa loo tixgelin karaa kulanka khuseeya go'aanka iyo tixgelinta maamulaha guud, Duqa magaalada ama Guddoomiyaha.

**68 Su’aallaha Dadweynaha**

Waqtiga su’aalaha dadweynuhu waa fursad xubnaha dadweynuhu ku weydiiyaan Golaha su’aallo si toos ah. Waqtiga Su’aasha dadweynaha loogama jeedo in xal lagu bedelo habka codsiga macmiilaha Banyule. Tani waxay fursad u tahay xubnaha bulshada inay ku waydiiyaan su'aalo ku saabsan arrimaha siyaasadda istiraatijiyadeed, u doodista, ama matalaadda tooska ah ee Golaha waana in loo isticmaalo ujeeddooyinkan. Su'aalahan iyo jawaabahaan waxaa lagu qori doonaa war-murtiyeedka shirka (diiwaanka dadweynaha) iyo halka uu qofka deganaha ahi uu bixiyay ogolaanshaha, waxaa ku jiri doona magaca su'aal soo gudbiyaha si loo tixraaco.

(1) Xubnaha ka mid ka ah dadweynaha ayaa laga yaabaa inay u soo qadimaan dadweynaha su’aal la weydiinayo fadhiga caadiga ah ee Golaha.

(2) Su’aallaha dadweynaha waa in la soo xereeyaa ugu dambayn 12ka duhurkii maalinta Jimcaha ka hor kulanka Golaha waxaana loo soo gudbin karaa:

(a) Iyada oo si caadi ah loogu dirayo su’aallaha dadweynaha websaytka Banyule; ama

(b) lagu soo xeraynayo qoraal ahaan: Governance, Level3, 1Flint off Street, Greensborough.

(3) Su’aallaha la hello wixii ka dambeeya 12ka duhurkii maalinta Jimcaha ka hor jadwalka fadhiga golaha ee la qorsheeyey, Jadwalka Golaha Kulanka, waxaa lagu dari doonaa fadhiga soo socda ee Golaha ama haddii aanay ahayn mid uu go’aaminayo Madaxa Sarkaalka Fulinta, Duqa Degmada ama shir gudoomiyuhu.

(4) Dhamaan Su’aallaha Dadweynaha waa inay ahaadaan kuwa la akhriyi karo kuna qornaadaan Ingiriis.

(5) Marka shuruudaha lagu soo qadimayo su’aasha iyada oo qoraalla iyo/ama iyada oo Ingiriisa, ay si aan la sababayn karin uga hortagaan ama caqabad ugu noqdaan su’aallaha ka qaybgalka waqtiga Su’aallaha dadweynaha, iyada mutarjum la soo marinayo haddii loo baahday. Faahfaahinta adeega mutarjumka la heli karo waxaa laga heli karaa https://www.banyule.vic.gov.au/Contact-us ama telefoonka ah (03) 9490 4222.

(6) Ugu badnaan hal (1) su’aalla qofkiiba ayaa la soo gudbin karaa.

(7) Su’aasha Dadweynaha waa in aanay:

(a) La xiriirin wax ajanda ah oo loo diiwaangeliyey Kulankaas Golaha ee aan Caadiga ahayn;

(b) Aanay ka badnayn 1500 xaraf.

(8) Su’aalaha iyo Jawaabaha dadweynaha waxaa u akhriyi doonaa dhamaadka kulanka Golaha xubin ka tirsan shaqaalaha Golaha.

(9) Haddii qofka soo gudbiyey su’aasha dadweyne uu joogo masraxa fadhiga golaha, waxaa laga yaabaa inay soo gudbiyaan Su’aashooda Dadweynaha keliya (macnaha guud iyo ujeedka ayaa la sharxi doonaa hadduu u baahan yahay sarkaalka soo jeedinaya su’aasha).

(10) Haddii qofka soo gudbiyey su’aasha dadweyhah aanu joogin goobta fadhiga Golaha, su’aashooda dadweynaha looma akhriyi doono.

(11) Dhamaan su’aallaha dadweynaha iyo jawaabaha waxaa lagu duubayaa xog-ururinta fadhiga, taas oo ay la socoto jawaab qoran oo ku socota su’aasha dadweynaha sidoo kalena waa la siinayaa qofka soo gudbiyey, iyada la isticmaalayo meesha lagala xiriiray.

(12) Magacyada dhamaan dadka soo gudbiyey Su’aallaha Dadweynaha iyo jawaabaha dadweynaha waa la haynayaa waxaana helaya councillors-ka iyo xubnaha Kooxda Maaraynta iyo Fulinta iyo Waaxda Dawlad wanaaga iyo Qayimka.

(13) Haddii aanu qofka soo gudbinaya Su’aasha dadweyhaha weydiisto in aan la xusin magaciisa, ama magacooda la hayo aana lagu darin barnaamijka dadweynaha, magacyadooda waa lagu faahfaahinayaa xuska kulanka golaha ay khusayso.

(14) Waxaa laga yaabaa in la diido su’aasha dadweynaha haddii duqa magaalada ama gudoomiyuhu, talasiin Madaxa Sarkaalka Fulinta ka dib iyo Dawlad wanaagu ay go’aansadaan in su’aasha:

(a) aan loo soo gudbin si waafaqsan qaybta 68aad ee Xeerarkaan Dawlad wanaaga;

(b) ay la xiriirto arrin ka baxsan waajibaadka, shaqooyinka iyo awoodaha Golaha;

(c) Ay tahay aflagaado, edeb daro, afxumo, cay, gaf, aan lug ku lahayn macnadara ah ama la diidi karo hadal ahaan ama waxay xambaarsan tahay;

(d) Ay la xiriirto arrin horay loogaga jawaabay fadhiga golaha;

(e) Looga jeedo in lagu bahdilo xubin guddiga degaanka ah ama shaqaalaha degaanka, ama la xiriirta arrin xubinta Golaha degaanka, ama la xiriirta aragti shakhsiyeed ama ficilada xubin degaan ama Xubin shaqaalaha Golaha;

(f) La xiriirta ceebaynta dabeecada ama wax-qabadka Madaxa Golaha degaanka ama xubin Shaqaale;

(g) La xiriirto arrima shakhsiyeed, arrima khuseeya dhibaato shaksiyeed oo degani kasta, cashuur bixiye, arrima warshadeed, arrima kunturaadyo, horumarin dhismo oo la soo jeediyey, talo sharci, arrimaha saamaynaya amaanka golaha ama hantida Golaha, ama xaallad kasta oo goluhu u arko inay waxyeellayso hantida Golaha ama xaallad kasta oo kale oo goluhu u arko inay waxyeelayso amaanka golaha ama qof uun, ama u baahan talada Sarkaalka fulinta ama ay ka go’an tahay in uu si aan la aqbali karin oo leexinayo khayraadka golaha si loogu diyaariyo jawaab waqtiga su’aallaha dadweynaha.

(h) wuxuu u baahan doonaa talada Sarkaalka Fulinta Sarre;

Wuxuu u baahan doonaa xagal daacin aan la aqbali karin oo khayraadka haddii ay tahay in la diyaariyo talada sarkaalka Madaxa Fulinta;

(i) Golaha a jawaabi karo iyada oo aan shaaca laga qaadin macluumaad sir ah sida ay qeexayso qaybta 3aad ee xeerka ama shuruudaha kalsoonida sida ay qeexayso qaybta 3aad ee xeerka ama shuruudaha qarsoodiga oo hoos imanaya xeer kale oo kasta oo goluhu uu raacayo;

(i) wuxuu u baahan doonaa leexin aan la aqbali karin haddii ay tahay in la diyaariyo waqtiga su’aallaha dadweynaha;

(j) La xiriirta macluumaadka mudnaanta sharciga ama arrin la xiriirta xarakaadka xoojinta sharciga; ama

(k) Horay loo weydiiyey uuna ka jawaabay Goluhu 12kii bilood oo ugu dambeeyey iyada oo loo marayo habka su’aallaha dadweynaha.

(15) Haddii, iyada ku xiran risiitka Su'aasha Dadweynaha, waxay buuxisaa shuruudaha kore oo lagu diidayo Su'aasha Dadweynaha, ogeysiin qoraala ayaa la siinayaa qofka magacaaban sababta oo kula talinaya sababta Su'aasha dadweynaha la aqbali karin sidaas darteedna la diiday.

**69 Wadajir-u-gudbin (Petition)**

Codsiga dacwadeed waa hab muddo hore la asaasay halkaas oo xubnaha bulshadu ay soo gudbin karaan dacwad ka keenid, si loogu muujiyo kaalmada bulshada codsi ama aragtida arrinta, waxa codsigaasi ama aragtidaas oo toos loogu soo qadimay Golaha.

Fursad buuxda ayaa la siinayaa xubnaha Dawlad Wanaaga, Kooxda Hogaaminta Fulinta iyo Xubanaha Golaha oo ay socdaan saxiixyada iyo macluumaadka shakhsiyeed oo lagu daray codsiga.  Codsiga buuxa oo ku jiro macluumaadka shakhsiyeed iyo saxiixyada laguma dari doono ajandaha dadweynaha. Golayaashu maaha inay la xiriiraan mid kasta oo saxiixay codsiga haddii aanay ahayn hogaamiyaha tartamaha, haddii aan laga helin saxiixyada shakhsiyeed.

1. Codsi kasta oo loo soo gudbiyey Golaha waxaa waajib ku ah:

   (a) inuu ku jiro faylka ku haboon ee Golaha;

   (b) in la akhriyi karo uuna yahay qoraal rasmi ah;

   (c) inuu yahay waadax bogga walba arrinta la weydiistay Golaha la xusay;

   (d) aanu ahaan aflagaado, sumcad dilid, ama aan la aqbali karin xagga luqada ama dabeecada;

   (e) aan la xiriirin arrimaha dibada ka ah awooda Golaha, iyo

   (f) in lagu daro magacyada, cinwaanada iyo saxiixyada asalka ah oo ugu yaraan 10 qof.

   (2) Marka codsiga ay saxiixeen in ka yar 10 qof, waxaa loo arkayaa warqad isku xiran waxaana toos loogu gudbinayaa xubnaha ku haboon ee shaqaalaha Golaha si wax looga qabto qodob hawleed ahaan waana inay wax ka qabtaan cidda ku shaqa leh.  Lamana geynayo fadhiga Golaha.

   (3) Dhamaan codsiyada waa in loo soo gudbiyaa Golaha saddex asbuuc ka hor kulanka la qorsheeyey ee Golaha.. Marka ajandaha kulanka Golaha loo soo daabaco (saddex asbuuc ka hor kulanka), lama soo gudbin karo saxiix siyaada ah.  Taariikhaha iyo mudaday ku egyihiin ee gudbinta codsiyada kulan kasta ee Gole ayaa lagu qorayaa websaytka Golaha tixraac ahaan.

   (4) Lama aqbalayo saxiixyo dambe wixii ka dambeeya soo gudbintii asalka ahayd ee codsiga. Xaallada marka saxiixyo siyaada ah la helo taariikhda soo gudbinta ka dib, iyada oo aan lagu soo darin saxiixyada guud ee la keenay

golaha, waxaa loo gudbinayaa  qaybta ku shaqa leh marka codsiga loo soo qadimo kulanka golaha ee ku haboon.

(5)  Codsiyada waxaa lagu soo gudbin karaa:

(a) Iyada oo rasmi looga xeraynayo website-ka Banyule;

(b) Iyada oo qoraalla la geeyaa: Governance, Level3, 1Flint off Street, Greensborough; ama (c) iyada oo lagu dirayo codsiga elektaroonigah ee Golaha.

(6) Xubin walba oo Golaha ka tirsan oo soo qadimaysa codsi qofkaas ayaa masuul ka ah in uu xaqiijiyo:
(a) inay fahmayaan qoraalka iyo ujeedka codsiga; iyo

(b) Codsigu in aanu ahayn aflagaado, magac-dil, ama aan la qaadan karin luqad iyo dabeecad ahaan.

(7)  Tala-soojeedinta ay qadarin karaan goluhu codsi kasta waa:

1. (a)  in codsigaasi la keeno lana qabto;
2. (b) in codsiga loo xawilo hay'ad ku shaqada leh si ay u eegaan ugana jawaabaan; iyo
3. (c)  in codsiga loo wareejiyo qaybta ku shaqada leh iyo in warbixinta dib loogu celiyo Golaha iyaga oo ka jawaabaya codsiga.

(8)  Haddii codsigu la xiriiro qodob ku qoran ajandaha kulanka ee lagu soo gudbiyey, codsiga waa laga yaabaa in wax laga qabto iyada oo uu la socdo qodobku.

(9)  Haddii codsigu la xiriiro arrin shaciyeed (statutory matter) taas oo ah mawduuca gudbinta dadweynaha sida waafaqsan sharciga, codsigu wuxuu qadarinayaa soo gudbin loo dhan yahay wixii la xiriira 'qorshaynta xaallada' ama 'arrin sharciyeed' (sida kaysku noqon karo laguna muujiyey hoos):

| **Arrimaha sharciyeed (waxay ku xiran tahay habka soo gudbinta gaarka ah) (Qorshayn)** | **Xaashiyaha saxiixyada badan (Gaadiidka iyo Bay'ada** |
|---|---|
| Arrimaha hoos imanaya qorshaynta iyo xeerka Bay'ada 1987 | Ku rakibida ama wax ka bedelida mid kasta ama dhamaan qaabka gaaridhigashada |
| Ogolaanshaha dhismaha 'warbixinta iyo habka ogolaanshaha | Dhamaan arrimaha la qadariyey oo hoos imanaya habka gaari dhigashada |

(10) Oo aan raacayn xeer hoosaadka (1)(a), Madaxa Sarkaalka Fulinta (Chief Executive Officer) ayaa laga yaabaa inuu goosto in elektaroonig ama petition-ka

online-ka loo gudbin doono fadhiga golaha oo aan loogu gudbin councilka e-petition kooda (tusaale ahaan change.org.petitions).

(11) Tirada saxiixayaasha ah online-ka ah ayaa la qaadi doonaa ama petition-ka online ah ayaa la qaadi doonaa si ay u ahaadaan nambarka saxiixayaasha ayaa la siiyaa Golaha si loogu gudbiyo fadhiga golaha. Saxiixayaal intaas ka badan lama qaadayo wixii ka dambeeya taariikhda gudbinta.

(12) qoraal gudbinta online-ka ama elektarooniga ah looma gudbin doono fadhiga Golaha haddii ay ka kooban yihiin saxiixyo been ama marin habaabin ah.

(13) Qadarin ayaa la siin doonaa eraybixinta petition-ka change.org. Halka eraybixinta la bedelay laga soo bilaabo waqtigii asal ahaan la diyaariyey lana hellay saxiixyada, waqti kale oo kasta oo qoraal gudbintu socotay, lama aqbali doono taas oo ay asal u tahay in qoraalku ujeedadiisa laga yaabo in la bedelay.

(14) Qoraal gudbin lama aqbalayo haddii:

(D) aan loo gudbin si waafaqsan xeerka 69aad ee xeerarkaan ismaamulka;

(E) ay la xiriirto arrima dibada ka ah waajibaadka, hawlaha iyo awoodaha Golaha degmada;

(F) ay tahay ceebayn, akhlaaq-xumo, afla-gaado, aan khusayn, macna daran ama aan la qaadan karin luqad ahaan iyo macna-wiyan.

(G) Waxaa looga jeedo ceebaynta xildhibaan ama xubin ka tirsan shaqaalaha golaha, ama la xiriirto aragtida shakhsiyeed ama ficilka xildhibaan shakhsi ah ama xubin ka tirsan golaha degmada

(H) ay la xiriirto akhlaaqda ama waxqabadka xildhibaanka ama xubin ka tirsan golaha;

(I) ay la xiriirtaa arrima shakhsiyeed, arrima khuseeya xaallad adag oo shakhsi kasta ama cashuur bixiye, arrima warshadeed, arrima heshiisyo, dhismayaal la soo jeediyey, talo sharci, arrima waxyeellaya amaanka golaha ama hantida golaha, ama arrin kasta oo kale oo goluhu u arko inay waxyeellayso golaha, ama shakhsi uun.

(J)  U baahan doona talada sarkaalka Madaxa Fulinta;

(K) U baahan doona xagal daacin aan la aqbali karin oo dhaqaalaha golaha, haddii jawaabtu ay tahay in loo diyaariyo waqtiga Su’aallaha Dadweynaha;

(L) xildhibaan oo hadda uu ku socdo baaritaan ama hadda sugaya natiijada habka dhexdhexaadinta Gudaha (Internal Arbitration process) guddiga Akhalaaqda xildhibaanka, ama guddiga xalinta dacwada, iyo ama

(M) La xiriirta macluumaad kaas oo mudnaan leh ama waxqabadka masuulka oo hadda baaritaan ku socdo.

(15) Marka codsigu uu ku dhamaado lix bilood, oo Goluhu aanu weli xalin sida laga yeelayo codsigaas, ama sarkaalka la socdaa aanu qaadin dariiqii loo mari lahaa, codsiga waxa lala tacaali doonaa codsigii asalka ahaa ee lagu soo gudbiyay Shirka golaha loomana tixgelin doono codsi cusub ahaan.

(16) Marka la soo gudbiyo codsi u ololaynaya Golaha natiijada tooska ah ee ka soo horjeeda dacwada hore loogu gudbiyay Golaha lixdii bilood ee la soo dhaafay, Goluhuna uu go'aan ka gaaro dariiqa loo marayo arrintan, codsiga ka soo horjeeda ayaa la siin doonaa waaxda ay khusayso iyo waaxda ay khusayso ayaa si toos ah ula xiriiri doona codsadaha hogaanka ah. Codsiyada elegtarooniga ah ama onlaynka ah waa in ay ku jiraan magaca iyo cinwaanka iimaylka codsadaha ama saxeexe kasta, kuwaas oo tafaasiil ka bixinaya, ujeedooyinka Xeerkan, u qalmi doonaa saxeexa codsadaha ama saxeexaha.